

Salaan qaali ah kaddib

Haddii aad dhigato iskuul heshiis la leh hay,adda waxbarashada ee soo saarta caawinaadda codka ah ee **ILT Inläsningstjänst**, Waxaad fursad u haysataa in aad hesho caawinaadda codka ah ee maaddooyinka iskuulka lagu barto oo lagu sharraxayo afka Soomaaliga. Waxaadna dhagaysan kartaa dhammaan qaybaha kala duwan ee caawinaadda codka ah. Sidoo kale waxaad dhagaysan kartaa qoraallada ku qoraan buugaagta oo af iswidhish lagu akhrinaayo. Barnaamujka caawinaadda codka ah wuxuu ardayga ka caawinayaa inuu ardayga si dhaqso leh uu ku fahmo maaddada, la socdo, isla markaana uu si caadi ah ula qabsado maaddooyinka uu ardayda kale ee fasalka la qaadanayo.

Barnaamujkan caawinta codka ah ma ahan oo kali ah casharradii oo la tarjumay ee waa casharro cod ah oo ay soo jeedinayaan macallimiin khibrad leh. Sidaas darteed marka aad casharrada ku dhagaysato afkaaga hooyo waxaa kuu fududaanaya in aad fahamto waxa uu casharku ku saabsan yahay. Taasna waxay keenaysaa in uu kordho rabitaankaaga waxbarasho. Waxaad casharrada ka baran doontaa erayada muhiimka ah ee casharka ku jira erayadaas oo aad af soomaalina ku fahmi doonto. **Haddaba ka faa,iidayso fursaddan waxbarasho ee qaaliga ah.**

Dhagayso

Marka aad dhagaysanaysaan caawinta codka ah waxaad galaysaan boggan www.inlasningstjanst.se ama appka ay leedahay Hay,adda waxbarashada ee (Inläsningstjänst). Appka waxaad kasoo dajisan kartaa isagoo bilaash ah App Store ama Google Play. Marka aad bogga gasho buugaagta aad rabto waxaad ka raadin kartaa qaybta maktabadda oo ah meesha buugaagtu ku qoran yihiin. Dabadeedna buugga aad rabto waxaad ku soo dajinaysaa khaanadda aad leedahay markaas ayaad dhagaysan kartaa. Sidoo kale waxaad kordhin kartaa dhaqsaha codka oo isla markaana meeshii aad rabto aad calaamadsan karto. Haddii aadan haysannin koodka lagu galo boggan caawinta codka ah waxaad la xidhiidhi kartaa iskuulka aad dhigato.

Luuqaddu waa
furaha aqoonta iyo
guusha
waxbarashada



Caawin iyo taageero dheeraad ah

Waxaad la soo xidhiidhi kartaa qaybta macaamiisha maalmaha isniinta illaa jumcaha saacadaha u dhexeeya 8.00 och 16.30. Haddii waqtiyo kale aad nala soo xidhiidhayso fadlan iimayl noo soo dir, markaasna sida ugu dhaqsaha badan ayaan kuugu soo jawaabi doonnaa.

Telefoon: 08 – 556 115 50

Epost: kundsupport@inlasningstjanst.se

Boggayaga waxaad ka heli kartaan filimaan muujinaya sida loo isticmaalo barnaamujka caawinta codka ah

www.inlasningstjanst.se/kundsupport.